

Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadaha oo socda

Sebtember 20, 2021

Dadka si buuxda loo tallaaley ama kuwa dhowaan sida gaarka ah isu baaray oo aan laga helin KOOFID-19 ayaa hadda awood u leh inay si ammaan ah u galaan meheradaha iyo munaasabadaha ka qaybqaadanaya ee guud ahaan gobolka.

Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadaha (Restrictions Exemption Program) ayaa u oggolaanaya ganacsiyada, goobaha iyo adeegyada u qalma in laga dhaafdo xaddidaadaha mugga iyo hawlgalka. Haddii aysan fulin barnaamijkan si ay gacan uga geystaan ilaalinta macaamiisha iyo ka hortagga faafidda KOOFID-19, waxaa laga rabaa inay u hoggaansamaan dhammaan tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha ee hadda jira.

Tallaabooyin caafimaad oo kumeelgaar ah ayaa hadda laga hirgelinayaa makhaayadaha, aroosyada iyo aaska, goobaga tafaariiqda, madadaalada iyo cayaaraha dadka waaweyn iyo jirdhiska si looga caawiyo yareynta faafidda KOOFID-19.

Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadaha (Restrictions Exemption Program)

Gobolka oo dhan, Dadka reer Alberta ee u qalma tallaalka iyo booqdayaasha Alberta waxaa laga rabaa inay keenaan caddeyn tallaalka oo ay dowladda soo saartay, baaritaan KOOFID-19 oo ah inaan laga helin oo si gaar ah la isaga bixiyay laga soo bilaabo 72 kii saac ee la soo dhaafay ama caddeyn sax ah oo ka dhaafid caafimaad si loo helo noocyo kala duwan oo ka qaybgal bulsho ah, madadaalo iyo dhacdooyinka iyo ganacsiyada.

- Ganacsatada iyo bixiyeyaasha adeegga ee hirgeliya barnaamijkan waxay isla markiiba oo aan xaddidnayn u adeegi karaan qof kasta oo:
 - Laga bilaabo Sebtember 20 ilaa Oktoobar 25, haystaa caddayn sax ah oo hal kuuro tallaalka laba helay ama in ka badan toddobaad ka hor wakhtiga adeegga; ama
 - Laga bilaabo Oktoobar 26 iyo wixii ka dambeeya, wuxuu haystaa caddayn taxane dhammaystiran oo tallaalka ah oo leh kuuradii labaad oo la helay laba toddobaad ama ka badan wakhtiga adeegga; ama
 - Uu hayo dokumenti ka -dhaafid caafimaad oo ka timid dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad; ama
 - Uu hayo caddayn dhawaan (72kii saacadood ee la soo dhaafay) baaritaan KOOFID-19 oo ah inaan laga helin ah (midkood PCR ama Baaritaan Degdeg ah).
 - Baaritaanka kama imaan karo Adeegyada Caafimaadka Alberta ama Sheybaarada Saxda ah ee Alberta.
- Kuwa ka yar 12 jir uma baahna inay keenaan caddaynta tallaalka ama baaritaan ah inaan laga helin ah si ay u galaan meherad ka qaybqaadata.

- Barnaamijkan ma khuseeyo ganacsiyada ama hay'adaha loo baahan yahay si loo helo nolol maalmeedka. Liis buuxa oo ah ganacsiga ku jira ama aan ku jirin ayaa laga heli karaa khadka tooska ah ee internetka ([available online](#)).
- Ganacsatada hirgeliya Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadaha waa inay sii wadaan raacitaanka shuruudaha afxirka lama huraanka ah ee gudaha.
- Dadka reer Alberta waxay hadda si sahlan oo dhaqso ah uga heli karaan caddaynta tallaalka oo cabbirka karaka ah alberta.ca/CovidRecords iyagoon samayn akoon online ah. Nuqulka warqadda ah ee diiwaanka tallaalka ee lagaa soo siiyay ballanta tallaalka ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa caddaynta tallaalka.

Tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha ee gobolka oo dhan ayaa dhaqan galaya laga bilaabo Sebtembar 20

Hawlwadeennada baaxadda leh ee u qalma laakiin aan fulin barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadaha, tallaabooyinka lama huraanka ah ee soo socda ayaa hadda hirgalaya:

Makhaayadaha

- Cunto ku cunidda dibadda ah oo leh ugu badnaan lix qof miiskiiba (hal qoys ama laba qof oo xiriir dhow la leh kuwa keligood nool).
- Xaddidaadda iibka khamriga iyo isticmaalka (10ka fiidnimo iyo isticmaalka 11ka fiidnimo) ayaa dhaqan galaya.

Aroosyada iyo aaska

- Dhammaan xafladaha iyo adeegyada gudaha waxay ku kooban yihiin 50 ka qaybgale ama boqolkiiba 50 awoodda xeerka dabka, hadba kii yar.
- Lama oggola soo dhaweynta gudaha.
 - Xarunta martigalinta waxay u qalmi doontaa inay hirgeliso Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadaha.
- Dhammaan xafladaha iyo adeegyada bannaanka ee aroosyada iyo aaska waa inay ku koobnaadaan 200 oo qof oo ka soo qaybgale ah. Soo dhaweynta dibadda waxaa looga baahan yahay inay raacdo iibka khamriga iyo xaddidaadda isticmaalka.

Xarumaha madadaalada (waxaa ku jira goob kasta oo gudaha ah, maktabadaha, shirarka, meelaha kirada ah, riwaayado, meelaha lagu caweeyo, baararka iyo wixii la midka ah)

- Imaanshaha ayaa ku xaddidan saddex meelood meel awoodda xeerka dabka oo ka qaybgalayaasha loo oggol yahay oo keliya inay la yimaadaan qoyskooda ama laba qof oo xiriir dhow la leh kuwa keligood nool. Ka soo qaybgalayaasha waa iney afka xirtaan oo ay jir ahaan kala fogyihiin 2 mitir oo u dhexeeya qoysaska.

Isboortiga dadka waaweyn, jirdhiska, waxqabadka iyo madadaalada

- Hawlaha gudaha
 - Lama oggola fasalo kooxedyo gudaha ah ama waxqabadyo.

- Tababar qof ka qof ah ama jimicsi gaar ayaa la oggol yahay laakiin kala fageynta jireed ee saddex mitir ayaa loo baahan yahay.
- Xiriir ineysan laheyn ciyaartooyda; tartamada gudaha waa la joojiyay marka laga reebo ka dhaafidda tallaalka la siiyay.
- Ma jiraan wax xaddidaad ah oo ku saabsan hawlaha bannaanka.

Hawlwadeennada ka baxsan baaxadda ee **aan u qalmin** Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadaha waa inay raacaan xannibaadaha caafimaadka dadweynaha sida lagu qeexay Amarka 42-2021 ([Order 42-2021](#)), oo ay ku jiraan shuruudaha afxirashada iyo kala fogaanshaha, iyo xadka deggenaanshaha.

Tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha ([Public health measures](#)) ee dhaqan galay Sebtembar 16 keedii ayaa weli ka jira gobolka oo dhan.

Si buuxda u isu tallaal

Tallaalku waa aaladda ugu awoodda badan dagaalka ka dhanka ah KOOFID-19. Ballamaha tallaalka ayaa si ballaaran loo heli karaa iyada oo loo marayo Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) ama farmashiyeyaasha ka qaybgala iyo rugaha dhakhaarta. Ka sameyso ballantaada alberta.ca/vaccine. Kuurada hore ayaa sidoo kale laga heli karaa goobo caafimaad oo la doorto oo aan balan u baahneyn.

Dhammaan dadka reer Alberta ee jira 18 sano iyo wixii ka weyn waxay xaq u leeyihiin inay galaan bakhtiyaanasiibka tallaalka Alberta ([Alberta's vaccine lottery](#)) mar haddii ay heleen laba kuurood oo tallaalka KOOFID-19 ah. Diiwaangelinta kama dambeysta ah ee halka \$1 malyan doolar ee bakhtiyaanasiibka ah ee xirmi doonta Sebtembar 23 keeda.

Alberta waxay kaloo billowday barnaamij dhiirrigelin ah si ay u gaarsiiso dadka reer Alberta ee 18 sano jir ka weyn kaarka bankiga oo \$100 doolar lacag ah ku jirto oo loogu talagalay dadka qaata kuurada koowaad ama labaad ee tallaalka KOOFID-19 inta u dhexeysa Sebtembar 3 iyo Oktoobar 14 si loogu dhiirrigeliyo dad badan oo reer Alberta ah si ay u helaan badbaado sida ugu dhaqsaha badan intii suurtagal ah. Liis dhamaystiran oo xeerar ah ayaa laga heli karaa khadka tooska ah ee internetka ee (alberta.ca/VaccineDebitCard).

Xog la xiriirta

- Xogta KOOFID-19 ee dadka reer Alberta ([COVID-19 information for Albertans](#))
- Tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha ee KOOFID-19 ([COVID-19 public health actions](#))
- Shuruudaha Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadaha ([Requirements for the Restrictions Exemption Program](#)) (PDF)

Weydiimaha warbaahinta

[Steve Buick](#)

780-288-1735

Xoghayaha Sare ee Saxaafadda, Caafimaadka

Si aad u hesho ilo badan oo dawladdu turjuntay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.